FSAU
Qaybta Falanqaynta Hubinta Cuntada ee Somalia

# Hubinta Cuntada & Nafaqada

## Warbixinta Kooban ee March 2006

Waxa la soo saaray
March 20, 2006

Cimilada

Suuqyada

Nafaqada

Beeraha

Xoolaha

Arrimaha Gobolka ee Soo Shaacbaxaya

## Cusboonaysiinta Warbkan Xiisadda Bina-aadamnimada ee Koonfurta Soomaaliya

■ **Cusboonaysiinta Warka Xiisadda Bina-aadamnimada ee Koonfurta Soomaaliya**
: Xaaladda hubinta cuntada ee goobo ka mid ah Koonfurta si degdeg ah ayay u sii xumaanaysaa

- **<u>Guuritaanka Dadka Dhibaataysan:</u>** Guuritaanka xoolaha iyo dadka dhibaataysan (qoysas dhan iyo qoysas kala go'ay labadaba) ayaa socda siina kordhaya dhammaan gobollada sida xun u saamoobay (*bogga 1*)
- **<u>Nafaqa-darrada:</u>** tartan degmooyinka ah oo ku saabsan saadka biyaha iyo daaqa ee kooban ayaa socda siina kordhayo dhor goobood, gaar ahaan Juba iyo Bakool, waxana jira shilal noocan ah oo laga soo sheegay Hiiran iyo Shabeellada Hoose (*Bogga 2*).
- **Nafaqa-darrada:** Xaalada nafaqada ee tiro badan oo dadweynaha ah ayaa ku wadda inay abuurayso walaac goobaha qaar waxana jira tilmaamo ah inay sii xumaanayso *(bogga 2)*.
- **<u>Helitaanka iyo fursad-u-helidda biyaha:</u>** badi biyo-galeennada ama ceelasha Gedo, Jubba, Baay, iyo Bakool iminka si buuxda ayay u qalaleen, taasoo ku khasabtay xoolaha iyo dadku inay guuraan si ay biyo u raadsadaan. Biyaha yar ee ku hadhay ceelasha aanay qotadoodu dheerayn, gaar ahaan way sumoobeen kumana habboona cabbitaanka dadka iyo xoolaha *(bogga 2)*.
- **<u>Xaaladaha Jidhka Xoolaha iyo Dhimashada</u>:** Xaaladda jidhka ee badi xooluhu si xun ayay u wiiqantay sababtoo ah biyaha iyo cuntadu kuma filla. Inkasta oo dhimashada xoolaha laga soo sheegayey Gedo labadii bilood ee la soo dhaafay, wararku iminka waxay muujinayaan in xooluhu ay dhimanayaan Jubbooyinka iyo qaybo ka mid ah gobolka Bakool *(bogga 2)*.
- **<u>Helitaanka Dalagga iyo Awoodda Wax Iibsiga</u>:** Saadka dalagga ee gudaha laga soo saaro iyo kaydkuba si weyn ayay u yaraadeen dhammaan Koonfurta Soomaaliya. Qiimaha dalagga ee dhammaan gobolladuna aad ayuu u kordhay laga billaabo ka hor xiisaddan. Dalagga gudaha iyo ka dhibadda laga keenaba, iminka waa laga helaa suuqa laakiin qayb badan oo dadweynaha ahi – kooxaha saboolka ah iyo kuwa hantidoodu dhaxayso – ma haystaan awood ku filan oo ay ku iibsan karan *(bogga 3)*.

■ **Jawaab-celinta Bina-aadamnimada ee Xiisadda Koonfurta Soomaaliya:** Ma cadda in jawaab-celinta bina-aadamnimada ee hadda jirtaa ay ku socoto heerka loogu baahanyahay in lagaga hortago natiijooyin halis ah oo ku yimaadda noloshada iyo hab-nololeedyada *(bogga 4)*.

■ **Illaa Xadkee ayay Taageerada Bulshada ee Soomaalida (oo ay ku jiraan xawaaladaha ama lacagaha dibedaha laga soo diro) dhimi karaan xiisadda hadda?** Taageerada Bulshada Soomaalidu waa qayb kale oo muhiim ah oo ka mid ah jawaab-celinta socota ee ku aaddan xiisadda. Su'aal muhiim ahi waxa weeye – 'illaa xadkee ayay taageerada bulshadu wax ka tari kartaa dhimidda xiisadda hadda"? *(bogga 5)*


■ **Digniino Hore oo ah in Halis Sare loogu jiro Macaluul haddii roobabka Guga 2006 ay ka Hooseeyaan Caadi:** Golaha Cimiladu wuxuu saadaalinayaa inay aad ugu eegtay in roobabka Gugu 2006 ay caadi ka hoosayn doonaan. FSAU/FEWSNET waxay soo saareen digiin hore in ***<u>haddii roobabka Guga 2006 ay caadi ka hooseeyaan</u>*** in qaybo ka mid Koonfurta Soomaaliya ay **Halis Sare ugu jiraan Macaluul/Masiibo Bina-aadamnimo laga bilaabo bisha Todddobaad illaa bisha Laba-iyo-tobnaad ee** 2006 *(bogga 6-7)*.

■ **Warbixinaha ka imanaya guduhu waxay muujinayaan in roobab ay ka da'een qaybo ka mid ah Jubbooyinka iyo gobolka Gedo badhtamihii bishan**, roobabkaasi waxay wax ka tari doonaan horumarinta fursad-u-helidda biyaha iyo daaqa. Inkasta oo ay dhiirigelin leeyihiin, haddana roobabkan sida aan caadiga ahayn hore u da'ay (bil ka hor xiliga caadiga ah), maaha macnahoodu in roobabka Guga 2006 ay noqon doonaan caadi ama kuwo ka sarreeya caadi.

### CUSBOONAYSIINTA WARKA XIISADDA BINA-AADAMNIMADA EE KOONFURTA SOOMAALIYA

### GUURITAANKA DADKA DHIBAATAYSAN

Guuritaanka Dadka Dhibaataysan ee qoysaska dhan iyo kuwa kala go'ay labaduba, wuu socdaa waanu sii kordhayaa dhammaan Koonfurta Soomaaliya sababtoo ah xaaladda xiisadda hubinta cuntada ee sii xumaanaysa. **Gobolka Gedo**, oo ah goobta ugu daran xiisaddan, badi xoola-dhaqatada iyo beero-iyo-xoola-dhaqatadu horeba waxay ugu guureen gobollada deriska la ah ee Baay iyo Jubbooyinka ama dhulka webiyada ee Gedo dhexdeeda ah iyagoo daaq iyo biyo u raadinaya xoolahooda. Qoysas dhan iyo xitaa tuulooyin dhan ayaa u guuray dhulka webiyada iygoo raadinya biyo, fursado dakhli iyo taageero bulsho. Waxa la soo sheegay, inkastoo aan wali la xaqiijin, in bishii la soo dhaafay gudaheeda tiro badan oo ah dadka tuulooyinka gobolka Gedo ay u gudbeen Kiiniya iyagoo raadinya kaalmo bina-aadamnimo (badi biyo).




Somalia Seasonal Timeline & Key Events

**Cinwaanka:**
FSAU - Somalia
Kalson Towers,
Parklands
Box 1230 Village Market
Nairobi, Kenya
**Tilifoonka:**
+254 20 374 5734
**Faakiska:**
+254 20 374 5098
**Email:**
fsauinfo@fsau.or.ke
www.fsausomali.org

**Gobolka Jubba**, waxa jira warar cusub oo sheegaya inuu aad u kordhay guuritaanka lagu tegayo iyo ka lagaga baxayo gobolkaas bishii Labaad ee sannadkan, laakiin gobolkaasi horeba waxa u joogay tiro badan oo xoolo iyo dad ka soo guuray Gedo iyo Waqooyiyga Bari ee Kiiniya. Hase yeeshee, Kormeeridda La Hagaajiyey ee Gurmadka ee FSAU wuxuu muujinayaa inuu kordhay dhaqdhaqaaqa dadka iyo xoolaha gobolka dhexdiisa iyadoo guuritaanku uu u jeedo dhinaca webiyada iyo dhasheegga. Dhaqdhaqaaqan gudaha ee kordhay waxa keenay sida xun ee biyuhu ay u yaradeen biyo galeennada iyo ceelasha qotadoodu ay gaabantahay ee dhammaan dhulka xoola-dhaqatada. Waxa lagu qiyaasay in 200-300 oo qoyas ay ka guureen dhulka xoola-dhaqatada ee Jubbooyinka bishii Labaad ee sannadkan oo ay u guureen dhulka webiyada iyo dhasheegga iyagoo raadinaya daaq iyo biyo. Guuritaanka Dadka Dhibaataysani wuu socdaa waanuu sii kordhayaa gobollada **Bakool** iyo **Baay.** Tusaale ahaan, saddexda xero ee dadka barakay eek u yaalla Waajid (Bakool) waxay ku wadaan inay ku soo biirayaan tiro badan oo ah dad ka soo barakacay dhulka ku hareeraysan ee abaartu ay saamaysay. Sidoo kale, qiyaastii 130 iyo 200 oo qoys oo ka tegay Qansaxdheere iyo Diinsoor (Gobolka Baay) ayaa la soo sheegay inay u guureen Baydhaba, iyagoo raadinaya fursado shaqo iyo taageero qabiil. Warbixinaha hore waxay tilmaamyaan in qaar ka mid ah lo'da xoola-dhaqatada Koonfurta Bari ee **Gobolka Baay** ay bilaabeen inay u guuraan Jubbada Dhexe, iyo in beero-iyo-xoola-dhaqatada Koonfurtu ay bilaabeen inay u guuraan Degmada Buurxakaba (Gobolka Baay) iyo **Shabeellada Hoose**. Dhacdadan cusub ee ah guuritaanka xoolaha dhibaataysani waa asddaan hore oo muujinaysa in xiisadda haddu ay degdeg u xumaanayso.

**NABAD LA'AANTA**

Tartan gudaha ah oo ku saabsan saadka iyo daaqa xadidan ama dhammaaday ayaa ah arrinta ugu muhiimsan ee keenaysa colaad sii kordhaysa. Bishii Labaad ee sannadkan, wмехан wararka ku saabsan colaadda ku salaysan saad waxay ugu badnaayeen **Jubbooyinka** (Degmooyinka Afmadow, Jilib, Xagar, Saakow iyo Bu'aale). Colaaddani waxay gaar ahaan ka dhaxaysaa xoola-dhaqatada iyo beeralayda dhulka webiyada-dhasheegga waxana ay ku saabsantahay fursad-u-helidda biyaha iyo cowska (Kormeeridda La Hagaajiyey ee Gurmadka ee FSAU, 15-28 bisha Labaad, 2006). Goobaha kale ee wararka ka imanaya ay sheegayaan colaad ku salaysan saad isla mudadan waxa ku jira **Gobolka Bakool** (degmooyinka tiyeglow iyo Waajid) iyo **Gobolka Shebeellada Hoose** (degmada Qoryooley). Labadii toddobaad ee u horreeyey bishan (March), dagaallo qabiil oo siyaasad ka kacay ayaa ka bilaabmay **Gobolka Hiiran** (degmada Buula Burti) kuwaasoo keenay in hanti hab-nololeedka ahi ay luntay iyo in dad badani ay ka guureen magaalada Buula Burti. Xiisad siyaasadeed ayaa wali ka jirta **Muqdishu** xiisaddaasoo ka dhaxaysa maxkmadaha Islaamigga ah iyo Isbahaysiga Dib u soo celinta Nabadda iyo La Dagaalanka Argagixisada

**NAFAQA-DARRADA**


Xaaladda nafaqa-darrada ee dad badan oo jooga Koonfurta Soomaaliya waxay ku waddaa inay walaac keenayso, goobaha qaarna waxa ka muuqda asddaamo muujinaya in xaaladdu ay sii xumaanayso (Khariidadda 1). Qiimaynta nafaqa-darrada ee FSAU iyo hay'adaha ay isbahaystaan ay ka sameeyeen G**obolka Bakool bishii Koowaad (**January) 2006, waxay muujinaysaa in xaaladda nafaqadu ay liidato iyo in kala duwanaanta cuntadu ay liidato in ka badan 80% kooxaha dadwynaha ee la qiimeeyey 24 saacadood ka hor qiimaynta; in ka badan 37% carruurta waxa haya cudurro; in ka badan 80% fursad uma haystaan biyo fayo qaba oo ay cabbaan. Xogta aan xisaabta ku salaysnayni waxay muujinaysaa in ay hoos u dhacday inta jeer ee wax la cuno iyo inta ay la eegtahay cuntadu labadaba. Xogta baraha xog-ururinta ee qaybo kale oo ka mid ah koonfurta iyo gobollada dhexe ee Soomaaliya (**Gobollada Jubbooyinka, Gedo, Hiiran iyo Galgaduud**) waxay muujinaysaa heerar sare oo nafaqa-darro aad u xun ah. Kala duwanaanta cuntada ee goobo badani hoos ayay u dhacaysaa. Waxa intaas raaca, tiro badan oo carruur ay nafaqa-darro aad u xumi hayso ayaa la dhigay Xarumaha Quudinta iyo Nafaqaynta ee Mareerey iyo Jilib **(Jubbada Dhexe**). Fursad-u-helidda xadidan ee cunto teyadeedu ay fiicantahay oo ku filan ayaa ah arrinta ugu weyn ee doorka ka ciyaaraysa heerarka sare ee nafaqa-darrada ah. Nafaqa-darrada liidata waxa sii xumeeyey dhacdooyinka sare kor ku xusan ee cudurrada iyo biyo-la'aanta.

**HELITAANKA IYO FURSAD-U-HELIDDA BIYAHA**

Helitaanka iyo fursad-u-helidda biyuhu wali waxa weeye arrinta ugu muhiimsan ee taabanaysa hab-nololeedka iyo nolosha dhammaan Koonfurta Soomaaliya. **Gobollada Gedo, Jubbooyinka, Baay** iyo **Bakool** badi biya-galeennada oo ay ku jiraan mugsidka iyo ceelasha qotadoodu gaabantahay si buuxda ayay u qalalanyihiin iminka. Biyo la'aan iyo fursad u helidda biyaha oo liidata, ayaa ku khasabtay xoolaha iyo dadku inay u guuraan si ay biyo uga raadsadaan dhulka webiyada iyo dhesheegga, berkadaha iyo saadka kale ee biyaha ee rasmiga ah. Biyo dhaamintu kuma filla inay wax ka tarto baahida xoolaha iyo dadka. Qiimaha biyaha ee badi gobolladu horeba wuxuu gaadhay heer aanay awoodi karin kooxaha saboolka ah iyo kuwo hantidoodu dhaxdhexaad tahay, Ceelasha shaqaynayaa kuma filla inay wax ka taraan baahida xoolaha iyo dadka. Dad iyo xoolo dheeraad ah ayaa ku uruuray meelaha biyaha rasmiga ah kuwaasoo culays dheeraad ah saaraya saadka biyaha ee kooban.

**Gobolka Gedo** badi biyaha wali la helaa laakiin waxay ku jiraan ceelal qotadoodu ay gaabantahay oo sumoobay oo aan ku habboonayn isticmaalka dadka iyo xoolaha. Degmooyinka Ceel Waaq, Baardheere iyo Garbahaarray, inkastoo aan la xaqiijin, waxa la soo sheegay inay ku geeriyoodeen 11 qof (oo ay ku jiraan shan carruur ahi) sababtoo ah waxay cabbeen biyo sumoobay bishii la soo dhaafay. Heerka biyaha webiga Jubba wuu ka hooseeyaa caadi teyada biyaha webiguna way liidataa (midabku waa madow, dhadhanku ma ficna, meelo badanna biyuhu way taaganyihiin). Dhammaan **Jubbooyinka**, badi biyaha dhulka caadiga ah ee biyo galeennadu way qalalanyihiin, iyadoo daaqa illaa 30 Kiiloo militir ku hareeraysan berkadaha shaqaynaya lagu batay oo la dhammeeyey. Qoysaska xoola-dhaqatada ah ee ladan oo keliya ayaa iibsankara biyaha la dhaamiyo goobaha weli laga helo daaqa. **Gobollada Baay iyo Bakool**, helitaanka iyo fursad-u-helidda biyaha, sidoo kale way saamoobeen. Biyaha Degmada Diinsoor (Gobolka Baay) waxa laga keenaa berkado u jira illaa 120 kiiloo mitir oo ku yaalla Saakow (Jubbada Dhexe). **Gobolka Hiiraan**, biyo dhaaminta waxa la soo sheegay markii u horraysay bishii la soo dhaafay inay ka jirto tuulooyinka sida Hees, Beer-gadiid iyo goobo kale si loo yareeyo dhibaatada biyo yaraanta.

**Khariidadda 1 : Qiyaasaha Heerka Nafaqa-darrada ee hadda , March '06**



## XAALADAHA JIDHKA XOOLAHA IYO DHIMASHADA

Xaaladaha jidhka xoolaha ee badi noocyada kala duwan ee xooluhu iminka si xun ayay u wiiqantay (gaar ahaan lo'da iyo adhiga) sababtoo ah la'aanta daaq iyo biyo ku filan iyo culayska la xidhiidha socodka dheer ee ay gelaan guuritaanka ay biyaha iyo daaqa ku raadinayaan. Warbixinaha ka imanaya guduhu waxay muujinayaan in Gedo iyo Jubbooyinka, xoola-dhaqatada ladani ay horeba u bilaabeen inay siiyaan xoolahooda siiba lo'da cows iyo dalag ay qiimo badan ku iibsadeen. Xoola-dhaqatada Gobollada Ba**ay iyo Bakool** waxay bilaabeen inay xoolahooda siiyaan cows qalalay oo ay ka soo qaateen korka mundullada ama aqallada ay ku noolyihiin si ay u badbaadiyaan xoolahooda.


Dhimashada xoolaha, inkasta oo aan la xaqiijin ayna adagtahay in si buuxda loo qiimeeyo, waxa si isdaba joog ah looga soo sheegay **Gobolka Gedo** (qiyaaso dad muhiim ah oo la waraystay ay ka bixiyeen xoolaha dhintay waa sidan: 60-70% lo'da, 35% wananka iyo laxaha, 40-50% riyaha iyo 15-20% geela). Dhacdo cusubi waxa weye in dhimashada xoolaha laga soo sheegay qaybo ka mid ah **Jubbooyinka** iyo gobolka B**akool**. Tusaale ahaan, warar aan la xaqiijini waxay muujinayaan in illaa 50 lo'da iyo adhigu ay maalin kasta ku dhimanayaan hareeraha berkadaha ama goobaha biyaha leh Gobolka Jubbada Dhexe, iyo weliba in tiro badan oo xoolaha ahi ay ku dhimanayaan degmooyinka Raab Dhuure, Ceel Berde iyo Xuddur (Bakool). Dhulka webiyada, lo'da waxa la sheegay inay ku dhaceen cudurro lafaha galan oo uu keenaan Gosha iyo gendigu iyo dooryaan, laakiin badi xoolalaydu ma awoodi karaan inay iibsadaan dawooyinka sababtoo ah dakhliga ay ka helaan xoolaha iyo soosaarka xooluhu wuu koobanyahay

## HELITAANKA DALAGGA IYO AWOODDA WAX IIBSIGA


Sidii hore loo sheegay, saadka dalagga ee gudaha ka soo baxay iyo kaydku aad ayuu u yaraaday dhammaan Koonfurta Soomaaliya sababtoo ah laba xilli oo is xiga ayay roobabku caadi ka hooseeyeen soosaarka dalaggana lagu guul-darraystay taasoo keentay soosaarkii dalagga sannadka ee ugu hooseeyey in ka badan toban sano (Warbixinta Kooban ee FSAU, February 22, 2006 ). Hoos u dhacani wuxuu ku yimi saadka dalagga ee gudaha. Sida cadna waxay tani ka muuqataa sida weyn ee uu u kordhay qimaha dalaggu dhammaan gobolladaas, noocay doonto ha noqoto lacagta lagu qiimaynayaa. Tusaale ahaan Shilinka Soomaaliya marka Doolarka Maraykanka loo eego (Tusmada 1). Qiimaha hadhuudhku hadda ayuu ugu sarreeyaa weligiis, xitaa wuxuu ka sarreeyaa qiimaha gallayda oo inta badan ka qaalisan hadhuudhka. Qiimaha gallaydu isna wuu sarreeyaa waanu sii kordhayaa. Qiimaha gallaydu wuxuu ugu sarreeyaa Jubbooyinka – intii u dhaxaysay bishii tobnaad (October) ee sannadkii 2005 iyo bishii Koowaad (January) ee sannadkan 2006 qiimuhu wuxuu ka sarreeyey 55-75% qiimaha dalagga ee dhulka laga beero hadhuudhka iyo Shabeellooyinka (Tusmada 1). Qiimaha gallayda ee Gobolka Jubba iminka 214% ayuu ka sarreeyaa intii uu ahaa abaarta ka hor (bishii koowaad {February} 2003)**.** Qiimaha hadhuudhka ee dhulka hadhuudka laga beeraa waxa ka muuqata inuu yahay qimaha sida ugu badan u kacay afartii bilood ee la soo dhaafay – qiime kacaas oo ah 66% (taniyo bishii kow-iyo-tobnaad { November} 2005) 185% ayaanuu ka sarreeyaa intii uu ahaa February 2003.

Inkasta oo uu guud ahaan hoos u dhacay soosaarka dalagga ee guduhu, haddana dalagga gudaha Soomaaliya laga soo saaro iyo ka dibedda laga keeno weli waa laga helaa badi suuqyada dhammaan Koonfurta sida ay sheegayso Kormeeridda La Hagaajiyey ee Gurmadka ee FSAU (Khariidadda 2). Shan keliya oo ka mid ah 29 degmo ayay ka muuqataa in dalagga gudaha aan laga helin suuqyada mudada 15-28kii bishii Labaad [February). Dalagga dibedda laga keeno oo keliya ayaa laga helayey suuqyadaas (degmooyinka Beled Xaawo, Doolow, Luuq, Xuddur iyo Belet Weyne).


**Tusmada 1: Celceliska Guud ee Bishii ee Qiimaha Dalagga (Doolarka Maraykanka)**




**Khariidadda 2: Helitaanka Dalagga guud ee hadda ee Suuqyada-February 15-28, 2006**




**Khariidadda 3: Kufillaanshaha Awoodda Iibsiga Dalagga - February 15 - 28, 2006**




warearka soo kordhay ee ku saabsan abaarta

Warbixinaha ka imanaya guduhu waxay muujinayaan in inkastoo gobollada qaar ay dhammeeyeen badi kaydkii dalagga ee u yaallay, tusaale ahaan Jubbooyinka, Gedo iyo Bakool, dalagga gududu waxa la geeyaa gobolladda Baay iyo Shabeellooyinka. Dalagga dibedda laga keeno (oo laga qaado Itoobiya, Kiiniya iyo dibedda kale) si joogto ah ayaa looga helaa suuqyada dhammaan gobollada koonfurta. Dadka muhiimka ah ee la waraystay (ganacsatada, dadka alaabta iyadoo jumlad ah dibedda ka keena, dadka iibsada iyo beeralayda) dhammaan gobollada koonfurta, hase yeeshee, kuma kalsoona in dalagga uu ku wadi doono in laga helo suuqyada illaa bisha toddobaad (July) ee 2006. Sida ay sheegayaan waraysiyada baadhitaan ah oo lala yeeshay dadkaas muhiimka ah ee la waraystay, 18 degmo oo keliya oo ka mid ah 31 degmo (58%), ayaa si joogto ah looga soo sheegay in dalaggu uu ku wadi doono in laga helo suuqyada illaa bisha July 2006 (Kormeeridda La Hagaajiyey eeGurmadka ee FSAU, 15-28 February 2006). Awoodda iibsiga dalagga ee dadku aad ayay u yaraatay waxana weeye mid ka mid ah dhibaatooyinka ugu ugu daran ee haysta badi qoysaska. Awoodda wax iibsiga oo aan ku filayn ama liidataa waxa keenay qiimaha dalagga oo aad u kordhay iyo dakhliga oo aad dhinmay (tusaale ahaan qiimaha xooluhu aad ayuu u yaraaday helitaanka xoolo iyo soosaarka xoolaha oo iib geli kara oo yaraaday; dakhligii dalagga oo lumay; iyo fursadaha shaqada oo kooban). Badi **gobollada Gedo, Bakool, iyo Baay, iyo weliba qaybo ka mid ah Hiiran iyo Shabeellada Hoose**, kooxaha saboolka ah iyo kowa hantidoodu dhexdhexaadka tahay waxa lagu tilmaamay inaanay haysan awood ku filan oo ay ku iibsan karaan dalag (Khariidadda 3).

Magaalada Afmadow (Jubbada Hoose), Saakow iyo Bu'aale (Jubbada Dhexe), awoodda wax iibsigu xitaa sidan si ka daran ayay u yaraatay. Goobahani si joogto ah waxa ka jira qiimaha ugu sarreyaa dalagga ee koonfurta, tusaale ahaan 55-75% ayuu qiimuhu ka sarreeyaa ka dalagga dhulka hadhuudhka laga beero iyo Shabeellooyinka (bisha Tobnaad {October} 2005 iyo bisha Koowaad {January} 2006). Qoysaska saboolka ah iyo kuwa hantidoodu ay dhexdhexaadka tahay waxa la soo sheegay inay ku dhaqmayaan dhowr xeeladood si ay u adkaystaan awoodooda wax iibsiga ee yaraatay. Xeeladahaas waxa ku jira inay dhimaan tirade inta jeer ee ay wax cunaan maalintii taasoo ah xagga tirada iyo tanka cuntatada ay cunaan maalintii (1-2 jeer ayay wax cunaan halkii ay 3 jeer wax ka cuni jireen), waxay u bedesheen dalan tayadiisu iyo qiimihiisu ay hooseeyaan, waxay raadsadaan cunto deeq ah, waxay kordhiyeen dalaga ay ku iibsanayaan ammaah ama deyn (Qoysaska ladan iyo kuwa ay hatidoodu dhexdhexaadka tahay), waxay ku tiirsanyihiin xigaal ama qaraabo, taageero bulsho iyo kaalmo bina-aadamnimo.

## JAWAAB-CELINTA BINA-AADAMNIMADA EE XIISADDA BINA-AADAMNIMADA EE KA JIRTA KOONFURTA SOOMAALIYA

Ma jiro war badan oo la xoojiyey oo ku saabsan jawaab-celinta dhabta ah ee bina-aadamnimada illaa hadda, sidaas darteed, way adagtahay in si toos ah loo qiimeeyo in jawaab-celintu ay ku filantahay baahida la tilmaamay iyo in kale. Suurtagalna maaha in si sax ah loo xaqiijiyo illaa xadka uu gaadhsiisanyahay faraqa jawaab-celintu. Sidaas darteed ma dhici karto xiligan in FSAU ay sawir ka bixiso baahida la tilmaamay iyadoo la barbar dhigayo jawaab celinta, sidii la sameeyey Gurmadkii Bina-aadamka ee Sool iyo Dooxada Nugaal (X, FSAU, X). Hase yeeshee si kasta oo ay u adagtay, in la xoojiyo warka jawaab-celintu waa muhiim waxana weeye qodobka u horreeyaa ee loogu baahanyahay kormeerid guul leh iyo hirgelinta jawaab-celin ku fulin kuna habboon.

Sida lagu tilmaamay maqaaladda kor ku xusan iyo xiisadda bina-aadamnimada ee la soo cusboonaysiiyey, way caddahay in xaaladdu ay ku waddo inay si degdeg ah u sii xumaanayso. Hase yeeshee, waxa aan caddayn inkaastoo ay socdaan howlaha dadaalka ah ee jawaab-celinta bina-aadamnimada inay ku socdaan heerka loogu baahanyahay inay ka hortagaan inay dhacaan natiijooyin aad u xun oo ku yimaadda nololaha iyo hab-nololeedyada. Tusaale ahaan, warka la helayaa wuxuu muujinayaa in bishii Labaad (February) 50% oo qof oo keliya lagu tilmaamay inay u baahanyihiin saad degdeg ah in loo wareejiyo (sida cunto, lacag naqad ah, waraaqo lacag u dhigma iyo wixii la mid ah) kaalmada lagu helay gargaarka cuntada. Waxa walaac dheeraad ah leh, 'fursad' lagu badbaadin kari lahaa hantida hab-nololeedka waxa laga yaabaa in aan laga faa'iidaysan, taasoo keeni kartaa in muddada xiisaddu ay daba dheeraato iyo in muddada dib u soo kabashadu ay dheeraatoo. Haddii ay arrintu sidan tahay, macnaheedu waxa weyee in dadka Soomaalidu laga yaabo inay naftoooda iyo hantidooda waayaan. Waxa kale oo ay macnaheedu tahay kharash sii dheeraad ah oo ku yimmaadda jawaab-celinta bina-aadamnimada ee degdegga ah, iyo maalgelin dheeraad ah in lagu sameeyo dib u soo kabashada hab-nololeedka ee loo baahanyahay.

**Sanduuqa 1: Cuntada Kaalmada ee Dhab Ahaan Laga Qaybiyey Soomaaliya, October '05 – Feb. '06.**

| | Oct. '05 (mt) | Nov.'05 (mt) | Dec. '05 (mt) | Jan. '06 (mt) | Feb. '06 (mt) |
|---|---|---|---|---|---|
| **CARE** | 3,460 | 0 | 5,285 | 0 | 5,306 |
| **WFP** | 4,773 | 1217 | 2,046 | 1,600 | 4,917 |
| **Wadarta** | 8,233 | 1,217 | 7,331 | 1,600 | 10,223 |

Xusid:
1. Xogta qaybinta cuntada gargaarka ahi waxay ka soo baxday WFP iyo CARE.
2. Tiradu waxa weeye wadarta cuntada kaalmada ah ee la qaybiyey, oo ay ku jiraan igargaarka, dib-u-haybayn, quudin taageero ah, iyo taageero bulsho dhammaan dalka.
3. CARE may qaybin cunto kaalmo ah bishii Koowaad (January) 2006 maaddaama ay 'laba' jeer cunto qaybisay bishii laba-iyo-tobnaad (December) 2005.

**Sanduuqa 2: Tirada Dadka Ka Faa'iidaysta Cuntada Kaalmada ah Soomaaliya, Feb. '06.**

| | Barnaamijyada Gargaarka, Dib-u-habaynta & Quudinta | Barnaamijka Gargaarka oo keliya |
|---|---|---|
| **CARE** | 263,610 | 246,114 |
| **WFP** | 290,872 | 233,268 |
| | **554,482** | **479,382** |

Xusid:
1. Tirada dadka ka faa'iidaystay cuntada kaalmada ahi waxay ka soo baxday hay'adaha WFP iyo CARE.
2. Xisaabtani waa wadarta dadka ka faa'iidaystay cuntada kaalmada ah (tirada dadka) dhammaan dalka.
3. Qiyaasta FSAU ee dadka ku jira Gurmada Bina-aadamnimo waa 915,000 dadka ku jira Xiisada Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun waa 715,000 (Warbixinta Kooban ee FSAU, February 2006).

***SAAMAYNTA WAXQABADKA:***

- Mudnaan in la siiyo wadaagga ay in xoojinta warka ku saabsan jawaab-celinta bina-aadamnimada, iyadoo si cad loogu ballanqaadayo in la eego warkan iyadoo la barbar dhigayo baahida.
- Hubinta jawaab-celin tafatiran oo ku filan marka la eego dhulka ay saamaynayso, si miisaaman, iyo in si habaysan ay howlaha isugu duwaan dhammaan daneeyeyaashu
- Kordhinta kaalmada baahidada degdegga ah iyo ta lagu taageerayo hab-nololeedka
- Mudnaan in la siiyo in loo isticmaalo 'xiisadda inay noqoto fursad' oo wax laga qabto sababaha ka dambeeya.
- Balanqaadan joogto ah in laga helo mamullada Soomaalidu inay hubiyaan in fursad u helid goobaha ah gargaarka bina-aadamnimadu ay helaan
- Taageero lagu wado lana kordhiyo in laga helo Soomaalida Dibedaha jooga iyadoo la isticmaalayo shabakadaha taageerada bulshada oo ay ku jiraan xawaaladaha ama lacagaha dibedda laga soo diro.

taageerada bulshada

## ILLAA XADKEE AYAY TAAGEERADA BULSHADA SOOMAALIDA (OO AY KU JIRAAN XAWILAADAHA AMA LACAGAHA DIBEDAHA LAGA SOO DIRO) DHIMI KARAAN XIISADDA BINA-AADAMNIMADA EE HADDA KA JIRTA KOONFURTA SOOMAALIYA?

Jawaab-celinta caalamiga ah ee heerka qaran ahi waa qayb keliya oo ka mid ah jawaab-celinta xiisadda bina-aadamnimo. Shabakadaha taageerada Bulshadu iyana door muhiim ah ayay ciyaaraan, gaar ahaan marka la eego Soomaaliya oo taageerada bulshadu ay aad u balaadhantahay tahayna hab weyn oo hantida la isugu wareejiyo. Waxa hanti wareejintaa qiyaasaha qaar ku saabsani ay tilmaamayaan in xawaaladaha oo keliyihi ay yihiin illaa 67% Wadarta Soosaarka Gudaha iyo inay toban jeer ka badantahay qiimaha alaabooyinka dibedda loo dhoofiyo[1].

Soomaaliya fursad-u-helidda shabakadaha taageerada bulshada, oo ay ku jiraan xawaaladaha iyo noocyo kale (sida irmaansi oo ah xoolaha irmaan oo la kala amaanaysto, xoola-goyn, aduud oo ah xoola dhalaya oo la siiyo saboolka, abuur oo ah iniinyo deeq loo bixiyo, doonfuul/hoorsi oo ah dhul beereed deyn lagu bixiyo, waxa ay yihiin waxyaabaha muhiimka au ah ka hortagga misiibada, adkaysiga iyo dib u soo kabashada. Taageeradani, waxa weeye hantida u weyn eek u jirrta salladda hantida hab-nololeedka ee la heli karo, waxana ay door muhiim ah ka ciyaartaa xaqiijinta nuglaanta askhaasta, qoysaska iyo kooxaha. UNDP waxay qiyaas ku bixisay in illaa hal malyuun oo Soomaali ahi ay u diraan Soomaaliya 1 billyan oo Dooarka Markaykanka ah sannad kasta. Sababtoo ah waxa jira dhaqan adag oo ah in la dadku ay wadaagaan hantida oo ay taageeraan qoysayskooda iyo qaraabadoodaba. Xawaaladuhu waxay debciyaan dhibaatada ka imanaysa masiibo (tusaale ahaan, saamaynta ay mamnuucidda Sucuudigu uu ku soo rogay xoolaha Soomaaliya laga dhoofiyo taniyo 1998 iyo saamaynta miisibada dabiiciga ah oo ay ka mid yihiin Sunaami, daadad iyo abaar).

Su’aal muhiim ahi waxay ku saabsantahay xiisadda bina-aadamnimada ee ka jirta Koonfurta Soomaaliya. **Su’aashaasoo ah Illaa Xadkee ayay Taageerada Bulshada ee Soomaalida (oo ay ku jiraan xawiaaladaha) dhimi karaan xiisadda hadda ka jirta Koonfurta Soomaaliya?** Inkasta oo aqoon faahfaahfsan oo saabsan xawaaladda gaadha soomaaliya ay xadidantahay, haddana FSAU iyo FEWS NET waxay isku dayaan inay xogta ku saabsan taageerada bulshada ku daraan falanqaynta hubinta cuntada iyo hab-nololeedka. Haseyeeshee, in tirokoob lagu sameeyo jawaab-celinta taageerada bulshadu wa mid ku dhow inaanay suurtal ahayn laakiin waxa jira tiro ah caddaymo oo fikrad ka bixinaya su’aasha guud.

Guud ahaan ,
- **Warqadaha lacaq qabashada Xawaaladdu waxay ku badan yihiin gobollada dhexe iyo waqooyiga Soomaaliya, marka loo eego Koonfurta Soomaaliya.** Warqadaha lacag qabashada xawilaaduhu maaha mid ay u simanyihiin Soomaaliya oo dhami
- **Bulshooyinka miyigu fursad toos ah uma helaan xawaaladaha marka loo eego dadka reer magaalka ah**. Waxana weeye bulshooyinka reer miyiga ah kuwa sida xun ay u saamaysay xiisadda haddu.
- **Tallaabooyin cusub oo sharciyeyn ah oo la soo rogay labadii sano ee la soo dhaafay ayaa la rumaysanyahay inay keeneen in wareejinta xawaaladaha tiradooda iyo inta jeer ee la diraabaa ay yaraadeen[2].** Kadib 11kii bishii Sagaalad qaraxyadii ka dhacay Maraykanka tallaabooyinka ka hortagga argagixisada ee la sameeyey waxa ka mid ah tallaabooyin cusub oo sharciyeyn ah. Tallaabooyinkaas sharciyeyta ahi waxay keeneen inuu kordhay kharashka diridda xawaaladdu iyo inay yaraadeen shariikadaha xawaaladda ee dalalka qaar ka shaqeeyaa. Saamaynta ay arrimahani ku yeesheen xaawaladda loo diro Soomaaliya waxa la rumaysanyahay inay aad muhiim u tahay, oo ay keeneen in xawaaladuhu ay yaraadeen iyo in ka jawaabiddooda xaaladaha xiisaddu ay dardartoodu hoos u dhacday.
- **Taageerada bulshada (oo ay ku jiraan xawaaladaha) Koonfurta Soomaaliya sida cad illaa hadda kuma filla baahida sii kordhaysa ee bina-aadamnimada, mana dhinto xiisadda sii xumaanaysa ee hadda jirta**. Waxa la rumaysanyahay inay jirto heer ay dadku halkii u damaysay gaadheen oo heerka ay gaadhsiisantahay xiisadda iyo tirada dadka u baahan taageero ay ka balaadhanyihiin awoodda jawaab-celinta bulshada. Waxa jira heer aanay taageerada bulshadu ku wadi karin inay fiddo oo ay ku fillaanto baahida sii kordhaysa. Waxana laga yaabaa in heerkan horeba ay dadku u gaadheen marka la eego xiisadda hadda jirta.

Jawaabta su'aasha kor ku xusan ee “**Illaa Xadkee ayay Taageerada Bulshada Soomaalida (oo ay ku jiraan xawaaladaha) dhimi kartaa xiisadda hadda ka jirta Koonfurta Soomaalia?**” - ***FSAU iyo FEWSNET waxay ku gabagabaynayaan in inkastoo taageerada bulshada wali loo baahanyahay in lagu wado si ay wax uga tarto dhimidda saamaynta buuxda ee xiisadda bina-aadamnimada ee hadda jirta, haddana kaligeed ma awoodayso inay si buuxda u yarayso ama uga hortagto inay sii xumaato xaaladda hadda ee masiibada haysata dadka iyo hab-nololeedkooda.*** Jawaab-celin la dedejiyo oo ay sameeyaan dhammaan dadka ka shaqeeya bina-aadamnimada ayaa loo baahanyahay si looga hortago natiijooyinka bina-aadamnimada ee la saadaaliyey.

**Xusid:**

[1]Eeg qoraalka uu soo saaray Baanka adduunka, Rajooyinka Dhaqaalaha Adduunka: Saamaynta Dhaqaalaha ee Xawaaladaha iyo Socdaalka, Lambar 34320, 2006; Kent, waxa qoray Karin von Hippel, oo uu la qoray M. Bradbury; “Sahlidda Bulshada, Horumarka iyo Dadka Dibadaha Jooga ’, Jaamacadda Kings College ee London, November 2004; C. Horst qoraalkiisa “Xawilaad: Muhimadda Isku Xidhnaanta Dibadaha ee Hab-nololeedka Qaxootiga Soomaalida ee Xerada Qaxootiga ee Dhadhaab, Kiiniya’, WPTC-02-14. [2] Wargayska IDS, “Sharciyada Cusub ee Xadidaya Xawaaladaha”, id21 Insights, lambar 60, January 2006 (eeg websaytka: http://www.id21.org)


## GOLAHA MUUQAALKA CIMILADU WUXUU SAADAALINAYAA INAY U EEGTAHAY IN ROOBABKA GUGA 2006 AY KA HOOSAYN DOONAAN CAADI

Golaha Muuqaalka Cimilada ee Geesweynaha Africa ee 17aad ee sannadkan oo lagu qabtay bishan March 1-3 Nayroobi, Kiiniya si la isugu raaco saadaashaa roobabka ee bisha Saddexaad (March) illaa bisha Shanaad (May).

Golaha oo ka koobnaa khubarada cimiladu waxay dib u eegeen xaaladda habka cimilada ee adduunka iyo saamaynta uu ku leeyahay gobolladan. Arrimaha ugu muhiimsan ee ee la tixgeliyey waxa ka mid ah aragtida ama saadaasha Kulaylka Badda Korkeeda ee Badweynta Baasifigga ee dhulka kulaylaha ah, korka kulaylaha Badweynta Atlaantiga iyo Badweynta Indiya.


Natiijooyinka laga soo saaray goluhu waxay muujinayaa inay si sii kordhaysa ugu eegtahay in roobabka Guga 2006 ay caadi ka hoosayn doonaan Geesweynaha Afrika oo ay ku jirto badi Soomaaliya muddada March illaa May 2006 (Khariidadda 5). Marka laga reebo dhulka xeebaha ee Jubbooyinka iyo qaybo ka mid ah Gobolka Awdal oo laga yaabo inay helaan roobab caadi ah Guga

**Khariidadda 5: Saadaasha Cimilada ee muddada, March-May '06**




Waxa soo saaray: ICPAC/FEWSNET

**Khariidadda 6: Habka Digniinta Hore ee Xoolaha Muuqaalka Cagaara Daaqa illaa May '06**




Waxa soo saaray: LEWS

## MUUQAALKA AAYAHA: SOOMAALIYA WAXAY HALIS SARE UGU JIRTAA MACALUUL

Iyadoo Ku salaysan Golaha Muuqaalka Cimilada ee 17aad saadaasha hore ee ka soo baxday ee ah in roobabka xiliga Guga 2006 (bisha Afraad {April} illaa bisha Lixaad {June}), FSAU iyo FEWSNET waxay soo saareen digniin hore oo ah in qaybo ka mid ah Koonfurta Soomaaliya ay **Halis Sare ugu jiraan Macaluul/Masiibo Bina-aadamnimo** laga billaabo bisha Toddobaad (July) illaa bisha Laba-iyo-tobnaad (December) 2006 (Khariidadda 6 iyo Warka Saxaafeed ee FSAU, March 13, 2006). Taasoo ah inay sidii hore si weyn uga sii xumaatay xaaladda hubinta cuntada sababta u weyni waxa weeye fursad-u-helid la'aan aad u xun oo cuntada, biyaha iyo daaqa ah oo keenaysa in abaartu ay aad u xumaatay iyo nabad la'aantu ay sii socoto.

Hadda, waxa jira qiyaastii 1.7 malyuun oo qof oo jooga Waqooyiga, gobollada Dhexe iyo Koonfurta Soomaalia oo ku jiraa xaaladu ah Xiisada Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun ama Gurmad Bina-aadamnimo (eeg Warbixinta Kooban ee FSAU, February 2006). (Dhacadada ugu xumi haddii ay timmaado oo ah in roobabka Guga 2006 ay caadi ka hooseeyaan) qiyaasha hore waxay sheegayaan in tiradu ay sii **kordhi doonto oo ay gaadhi doonto 1.8 malyuun** inta u dhaxaysa July iyo December 2006. Inkastoo tirada korodhay aanay u eegayn inay aad u badantahay haddana waxa ku jira **Isbedel weyn oo ah inay xaaladdu sii xumaanayso,** iyadoo **40% dheeraad ah** oo tirada dadka uu ka hor iman karo Gurmad Bina-aadamnimo ama **Macaluul/Masiibo Bina-aadamnimo** (tiradaas oo ka kordhaysa ta hadda ee ah 900,000 gaadhaysana 1.3 million). Marka lagu daro dadweynaha barakacay oo ah qiyaastii 400,000, tan macanaheedu waxa weeyee in illaa 2.2 malyuun oo qof oo Soomaali ah ay soo food saartay xiisad aad u xun oo hubinta cuntada ahi.

***SAAMAYNTA JAWAABCELINTA:***
Iyadoo ay weli ay dhici karto in roobabka Guga 2006 ay noqdaan caadi ama caadi ka sarreeyaan, haddana marka la eego saadaasha ah inay aad ugu eegyihiin inay caadi ka hoosayn doonaan–marka lagu daro xaaladda **Gurmadka Bina-aadamnimo** ee Koonfurta Soomaaliya, iyo inay dhici karto in colaaddu ay sii fiddo. Markaas waa muhiim in dhammaan daneeyeyaashu ay u diyaar garoobaan dhacdada ugu xun ee bina-aadamnimo iyo hab-nololeed. Dhacada ugu xumi haddii ay itmmaado waxay saamayn adag ku yeelan doontaa jawaab-celinta bina-aadamnimo:


- in la dedejiyo mudnaanna la siiyo in gudbinta jawaab-celin sidii hore ka tafatiran kana habaysan oo ku aaddan baahida hadda jirta ee bina-aadamnimada ee la tilmaamay. Jawaab-celinta bina-aadamnimada ee degdegga loogu baahanyahay in inay ku fillaato baahida degdegga ah ee dadka ugu nugul (cuntada, biyaha caafimaadka). Waxa intaas raaca in culays la mid ah la saaro ilaalinta iyo dib u habaynta hantida hab-nololeedka, iyo in wax laga qabto sababa ka dambeeyaa. Jawaabcelin kala dhiman, meel gooni u ah ama liidata marka la qaybiyo ama ay dib u dhacdo waxba kama qaban doonto xaaladda hubinta cuntada ee sida degdegga ah u sii xumaanaysa.

- Hay'adaha Jawaab-celinta bina-aadamnimadu waxay u baahanyahiin inay sameeyaan qorsheyaal iyo mashaariic loogu talagalay dhacada ugu xumi haddii ay timmaaddo, iyo inay raadiyaan saadka loogu baahanyahay hirgelinta qorsheyaashaas iyo mashaariicdaas.

- Waxa muhiim u ah in maalgelin ku filan iyo jawaacelin caalimi ah la helo in la barbar dhigo xiisadaha kale adduunka ka jira.

Haddii la eego dhacdada in roobabaka Guga 2006 ay noqdaan caadi ama ay ka sarreeyaan, waxa weli loo baahan doonaa in lagu wado kaalmada la siinayo badi dadka nugul iyo in si buuxda loogu wado gargaarka bina-aadamnimada ee lagu taageerayo dib u soo kabashada hab-nololeedka ee ku aaddan dib u soo celinta hantida badan ee luntay iyo deynka ay dadku galeen abaartan. Sidoo kale waxa muhiim ah haddii ay dhacdadani timaaddo, in wakhtiga loo baahyahay la qaybiyo abuur ama iniinyo iyo qalab intaanay roobabku di'in, si loo hubiyo in qoysaska beeralayda iyo beer-iyo-xoola-dhaqatadu ay dalag beeran karaan si ay si buuxda uga faa'iidaystaan roobabkaas.

**Khariidadda 6: Falanqaynta Xaaladda Hubinta Cuntada ee Soomaaliya: Saadaasha Dhacadada Haddii Roobabka GuGuga 2006  ay Caadi ka Hooseeyaa**




**Warbixinaha iyo War Saafadeedyada Dhowaan Af Ingriisiga ku soo baxay**
*Warbixinta Nafqada ee FSAU,, February, 2006*
*Warbixinta Xogta Suuqa ee FSAU/FEWSNET, February 2006*
*Warbixinta xogta Cimilada ee FSAU/FEWSNET  February 2006*
*Warbixinta FEWSNET Soomaaliya ee Gurmada Hubinta Cuntada, February 2006*
*Taxanaha Farsamada ee FSAU  lambar IV.8 Falanqaynta Deyrta 2005/06 Kadib, February 22, 2006*
*War Saxaafadeedka FSAU, March 13, 2006*

**Warbixinaha iyo War Saafadeedyada Dhowaan Af Soomaali ku soo baxay**
*Warbixinta Kooban ee FSAU, February 22, 2006*
*War Saxaafadeedka FSAU, Marych 13, 2006*

**Raad raac:** [1] Si aad u hesho warbixin kooban oo ku saabsan Qoondaynta Xaaladaha eeg Taxanaha Farsamada ee FSAU  lambar IV.8 Falanqaynta Deyrta 2005/06 Kadib, February 22, 2006 oo ku soo baxday Af Ingriisi

saadaasha in roobabka Gugu ay caadi ka hoosayn doonaan

Technical & Managerial Support

Funding Agencies

Technical Partners